

Somali

Waalidiinta Qaaliga Ahow,

Waxaan dhowaan soo marnay waqti adag, balse waan maareynay innagoo iskaashanayno. Kaliya ma ahayn inay dukaamada iyo ganacsiyada badankood xirnaayeen balse sidoo kale dugsiyada dalka oo dhan. Casharrada waxaa lagu qaadanayay guriga. Gabadhaada/wiilkaaga waxaa laga yaabaa inaysan awoodin inay sidoo kale waxbartaan ayna isugu diyaariyaan sannad-dugsiyeedka soo socda sida ayaga oo dugsiya jooga, halkaasoo macallimiinta mar walba diyaar ugu yihiin ardayda, si ay u taageeraan oo wax ula bartaan.

Waxaan sidaas darteed u soo bandhigaynaa dugsiya xagaaga gaar ahaan gabadhaada/wiilkaaga labada isbuuc ee ugu dambeeya fasaxa, kuwaasoo ay ugu diyaargarooobi karaan sannad-dugsiyeedka cusub, iyo sidoo kale ku wanaajin karaan oo ku adkeyn karaan xirfadahooda Jarmalka.

Diiwaangelinta dugsiya xagaaga waxaa loo marayaa foomka diiwaangelinta ee lifaaqa ah. Marka la diiwaangeliyo, xaadiritaanka dugsiya xagaaga waa waajib. Fadlan gudbi foomka diiwaangelinta ugu dambeyn 22 Juun 2020 markay tahay.

Bitte suchen Sie aus der beiliegenden Liste den für Ihr Kind den Standort aus, der am besten erreichbar ist und tragen Sie den Namen und die Adresse der gewählten Schule hier ein:

--

Diiwaangeli gabadhaada/wiilkaaga! Waxaan rajeynaynaa inaan ku soo dhaweyno ilmahaaga dugsiya xagaaga. Haddii aad qabtid wax su'aalo ah, fadlan si xor ah iila soo xiriir.

Ihre Direktorin Mag.^a Dagmar Kerschbaumer
Maamulaha

AHS Heustadelgasse
Heustadelgasse 4
1220 Wien

[Maamulaha: fadlan geli magaca iyo cinwaanka dugsiya]

Somali

WARQAD DHEERAAD AH Sanduuqa Isdhaxgalka

Sanduuqa Isdhaxgalka ee Ostariya (ÖIF) sidoo kale wuxuu wax ku biirinayaa waalidiinta :

Waxaa muhiim u ah waxbarashada sii socota ee ilmahaaga inaad awoodid inaad taageertid waxbarashada ilmahaaga iyo sidoo kale inta aad awoodid . Si gacan looga geysto tan, Sanduuqa Isdhaxgalka ee Ostariya (ÖIF) wuxuu sidoo kale u soo bandhigayaa koorsooyin waalidiinta ardayda dhigata dugsiga xagaaga. Koorsooyinka waxay ka kooban yihiin macluumaad muhiim ah oo ku saabsan dugsiga xagaaga iyo nidaamka dugsiyada Ostariya. Koorsooyinka loogu talagalay waalidiinta waxaa laga bixin doonaa dhammaan gobollada laga bilaabo 22-da Juun waxaana loo turjumi karaa luuqado badan oo qalaad haddii loo baahdo. Ka qeybqaadashada koorsooyinka waa lacag la'aan waana is diiwaangelin kartaa adoo u maraya www.integrationsfonds.at/elternkurse, telefoonka tel. 01/715 10 51 – 263, iyo fool-ka-fool Xarumaha Isdhaxgalka ee Sanduuqa Isdhaxgalka ee Ostariya (ÖIF) oo dhan .